**Ammahashada maktabadaha kale** Waxaad saf u geli kartaa buug qof kale amaahday. Haddii aad raadineyso buug aan oolin, waxaan isku dayeynaa in aan kaaga soo amaahanno maktabaddo kale. Marka buugaasi yimaado maktabbadan, waxaa fariin laguugu soo dirayaa boostadda amma e-mailka. Marka laguu keeno,buugga aad dalbatay, waxaad bixindoontaa lacag yar.

Ma dooneysaa buugaag badan oo ku qoran afaf shisheeye, nala socodsii. Waxaan kuu soo amaahaneynaa buugaag badan oo afkaas aad dooneyso ku qoran. Waxaan buugaagtaas dhignaa Qaanadaha afafka kala duwan ee, dabaqqa 4, oo aad ka amaahan karto lacag la'aan. Waxaa buugaagta laguu keydinayaa muddo 4 bilood ah, inta aan dib loo celin.

**Kombiyuutaradda maktabadda** Isticmaalidda kombiyuutaradda waa lacag la'aan. Marka aad isticmaaleyso kombiyuutarada waxaa ku saaran xil ah in aad raacdo xeerarka u yaalla, gaar ahaan kombiyuutaradda. Bogga anshaxa xun iyo kuwa u muuqda midabtakoorka ee internetka waxaa ka reeban in la gallo.

## Sidaan ayaad ku heli kartaa maktabadda Mimers Hus

Maktabadda waxay ka kooban tahay seddex dabaq. Dabaqyadda oo dhan waxaa laga heli karaa Suugaanta iyo meediyaha afaf kala duwan

### Soo gelidda, dabaqa 2, waxaad ka heli kartaa:

- Buugag cusub
- Wargeysyo iyo majaladdo(magazine)
- Muusiko
- Filimadda fiidiyowga oo la kireysto (ijaarto)
- Buugaagta Swidhiska fudud
- Buugaagta codka ah
- Buugaagta caruurta iyo dhalinyaradda
- Suxuunta CD ga caruurta

Waxaad halkan ka heli kartaa oo kale qolka aqriska iyo qorista.

### Dabaqa dhexe, dabaqa 3, waxaad ka helaysaa:

- Buugaagta rasmiga( Fakta) ah oo loo raseeyey habka maadooyinka isugu xigaan. Waxaa ugu horeeya buugaagta Swidhishka, kadibna buugaagta ay isku maadada yihiin oo afaf kala duwan ku qoran
- Koorsooyinka afka iyo qaamuusyadda
- Waxaa halkan ka helikartaa, laba qol kooxeed iyo qolka aamusnaan wax loogu aqristo.

### Halka ugu sareyso, dabaqa 4, waxaad ka heleysaa:

- Waaxda Guri iyo Aqal ( Hus & Hem). Waxaa yaala buugagta cunnada, buugaagta farshaxanta, dhismaha iyo qaar kale.
- Suugaanta sheekooyinka, waxaa la oran karaa, sheeko xariir, gabayo iyo riwaayaddo Swidhish ah.
- Qaanadaha afafka kala duwan iyo sheekooyinka afaf kala duwan
- Meel da'yarta iyo dadka waayeyn ay ku dhageystaan qalabka maqalka
- Aqal laga sameeyey suugaanta Kungälv, Göteborg och Bohuslän.

Si aad kaalmo u hesho, waxaan heynaa tusmadda digitaalka ah, oo ku tusinaysa halka ay buugaagta ka yaalaan maktabadda. Waxaad ka heleysaa tusmadda kombiyuutarka oo ku yaal bogga internetka.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan Maktabadda degmadda waxaad ka heli kartaa bogga internetka : www.kungalv.se/bibliotek

**Fadlan ka codso kaalmo shaqaalaha!**

# KU SOO DHAWAADA MAKTABADDA

SOMALISKA

**Kungälvs Stadsbibliotek**

KUNGÄLVS KOMMUN

# KU SOO DHAWAADA maktabadda

Waxaad hadda heshay kaarka cusub. Waxaan rajeynaynaa in uu ku faraxgeliyo. Kaarkaas wax baad kaga amaahan kartaa maktabaddaha Kungälv, Kode, Kärna, Marstrand, Diseröd (Romelanda) iyo Yt-terby.

## Halkan waxaad lacag la'aan ku ergan (dayman) kartaa:

- Buugaagta caruurta iyo dadka waaweyn oo afaf kala duwanleh
- Abwaanada (qaamuusyada).
- Koorsooyinka afka Swidhishka
- Buugaag af Swidhish fudud ku qoran
- Muusik CD ah iyo muusik fiidiyow leh
- CD yada caruurta iyo dadka waaweyn
- Buugaag lagu duubay cajaladdo iyo CD
- Wargeysyadii hore iyo majaladaha (Magazine)

## QIRASHADA AMAAHDA

Waxaan cadeynayaa in aan aqristay sharciga amaahda oo aan raacayo:

| | |
|---|---|
| Magaca awoowaha / Efternamn: | |
| Magacaaga / Förnamn: | |
| Lambarka dhalashada / Personnummer: | |
| Adreeska/Gatuadress: | |
| Lambarka boostada / Postnummer: | Lambarka adreeska / Postadress: |
| Telefon: | Mobiltelefon: |
| E-mail: | |
| Tariikhda/Datum: | |
| Saxiixa /saxiixa wakiilka Underskrift /Målsmans underskrift: | |

## Waxaad kaloo Maktabadda ku:

- Aqrin kartaa wargeysyadda iyo majaladaha afaf kala du wan ku qoran.
- Adeegsiga Internetka amma prograamka wax ku qorista. Kombiyuutaradda waxaad ka xajisan kartaa Internetka si toos ah amma kombiyuutarka gaarka ah ee maktabadda.
- Tababarashada afka swidhishka iyo buugaagta barashadda gawaaridda (Baabuurta).
- Ergashadda fiidiyowga iyo filimadda DVD ga.

## Kaarka maktabadda waa wax qiimo leh

Qof walba oo 18 jir ka weyn, waa in uu is cadeeyo si loo siiyo kaarka amaahda. Qofkii ka yar 18 jir waxaa looga baahan yahay qof weyn oo wakiil ka ah amma kaarka wakiilashada. Kaarka ugu horeeya waa lacag la'aan. Haddii uu dhummo(lummo), waxaad bixin doontaa wax yar adoo waliba tusaya cadeyn amma kaarka wakiilashada.

**Lambarka sirta** Kaarka amaahda waxaa ku xiran lambar sir ah. Waxaa loo adeegsadaa in lagu galo Internetka si aad u aragto amaahda, cusbooneysiinta, dalbashada buugaagta, qalabka dhageysiga iyo xajinta kombiyuutarrada maktabadda.

**Xilliga amaahda** Xilliga amaahdu waa afar todobaad, eeg (fiiri) rasiidka amaahda. Adiga ayaa u xil saaran wixii aad amaahatay ilaa iyo inta laga tirtirayo diiwaanka amaahda. Haddii, waxa aad amaahatay ay wax gaaraan amma lumaan, waxaad bixin doontaa qiimahooda.

**Warbixinta qofka** Marka aad saxiixayso kaarkaaga amma kaarka caruurtaada waxaad maraysaa ballanqaad, sida ku xusan go'aanka sharciga warbixinta qofka, waxaana ay warbixintaadu galeysaa diiwaankaaga. Warbixintaada looma adeegsankaro wax ka baxsan hawlaha maktabadda. Buugaagta amma qalabka dhageysiga ee aad ammahato, waxaa lagu qorayaa kombiyuutarka maktabadda. Warbixintaas oo dhan waa mid dahsoon, taa micnaheeda waa in qof kale uusan ogaan doonin waxa aad amaahatay. Marka aad soo celiso amaahda amma dhiibtid qaanta laga yaabo in lagugu yeesho, waxaa warbixitaas laga tirtirayaa kombiyuutarka. Waxaad mar walba codsan kartaa in aad ogaato waxa diwaanka laguu geliyey adigoo cadeyn wata.

**Kaligaa sameyso** Maktabadda waxaa yaala qalab kuu fududeynaya in aad kaligaa amaahato amma soo celiso buugaagta. Taas micnaheedu waa in xil dheeraad ah kaa saaran yahay ammahda. Shaqaalahu waxay kaa gargaarayaan ammahda amma dib u soo celinta CD ,cajaladaha, fiidiyowga, wargeysyadda iyo waliba la soo daahidda iyo ammahda buugaagta

**La daahidda amaahda** Haddii aad ku keeni weydo waqtigii laguu qabtay , waxaa dushaada ah ganaax. Haddii aad wax badan la soo daahdo waxaa laguu soo dirayaa warqadda xusuusinta, haddii aad haddana soo celin weydo waxaa laguu soo dirayaa ganaax. Taas micnaheedu waa in aad bixiso muddadii aad la soo daahday iyo warqadda ganaaxa canshuurteeda. Ganaax la bixinwaayo waxaa uu kuu horseedayaa in kaarka amaahda la joogiyo. Ugu danbeyta haddii intaas oo dhan aad iska dhega tirto waxaa arimahaada la wareegaya hay'adda xaraashka (inkasso).